






XEERKA ANSHAXA DAGAALYANNADA





ICRC

-  facebook.com/ICRCAfrica
-  x.com/ICRC_Africa
-  instagram.com/icrc_africa

International Committee of the Red Cross


19 avenue de la Paix
1202 Geneva, Switzerland
T +41 22 734 60 01
shop.icrc.org
© ICRC, January 2025

Illustrations by Victor Juhasz

XEERKA ANSHAXA DAGAALYANNADA

XEERKA ANSHAXA DGAALYANNADA

1. Kaliya weerar kuwa dagaallamaya iyo bar-tilmaameedyada militari.



2. Ha weerarin dadka rayidka ah ama agabka rayidka.



3. Ha weerarin dagaalyhannada aan dagaallameynin – oo ay ku jiraan kuwa dhaawacmay, kuwa buka ama dagaalyhannada markabkoodu badda kula qalibmay iyo kuwa isa soo dhiibaya ama la qabtay.



4. Ha waxyeeleyn hana xadin hantida rayidka.
5. Burburinta ku koob inta ay hawshaadu u baahan tahay.



6. Ha isticmaalin hub ama xeelado sababa dhibaato ama dhaawac aan loo baahnayn ama geysan kara saamayn aan kala sooc lahayn ama aan loo meel dayin. Ha isticmaalin hubka mamnuuca ah.



7. Ka taxadar oo ka fogow waxyeellaynta dadka rayidka.
8. Sameey dhammaan taxaddarrada suurtagalka ah si looga fogaado ama loo yareeyo waxyeellada kadiska ah ee soo gaarta dadka rayidka ah iyo agabka rayidka iyo in dadka rayidka ah laga ilaaliyo khataraha hawlgallada ciidanka.



9. Gaajo ha ku dilin dadka rayidka ah ama ha u diidin waxyaabaha muhiimka u ah badbaadadooda.



10. Raadi, soo aruuri daryeel caafimaadna u fidi kuwa buka iyo kuwa dhaawaca ah ha ahaadaan saaxiib ama cadow.



11. Raadi, soo aruuri oo ixtiraam meydka. Xafid macluumaad kasta oo gacan ka geysan doona in la aqoonsado.



12. Ilaali kuwa isa soo dhiibay ama la soo qabtay. ula dhaqan si bini'aadamnimo leh oo ku wareeji taliyahaaga
13. Si bini'aadamnimo leh ula dhaqan dadka rayidka ah ee xukunkaaga ku hoos jira.
14. Ka ilaali dadka rayidka ah dhammaan nooc kasta oo si xun ula macaamil ah.



15. Ha qafaalan dadka hana ka dhigan gaashaan.



16. Ha ku kicin fal kufsi ah ama tacadi kale oo ku saleysan jinsiga.



17. Si qasab ah ha u barakicin dadka rayidka ah.



18. Carruur ha u qorin ciidankaaga, dagaalkana ha u isticmaalin.



19. Ixtiraam oo dhowr dhammaan shaqaalaha caafimaadka iyo kuwa bani'aadamnimada, xarumaha iyo gaadiidka. Ha u isticmaalin xarumaha caafimaadka ama gaadiidka ujeedooyin ciidan.



20. Ha weerarin shaqaalaha ama agabka - oo ay ku jiraan baabuurta, maraakiibta iyo diyaaradaha - sita iskutallaabta cas, bil cas ama calaamadda kiristalka cas. Si xun ha u isticmaalin astaamaha.



21. Sida ugu dhaqsaha badan ee suurtoogalka ah u oggolow in gargaarka bani'aadamnimadu uu gaaro dadka rayidka ah ee u baahan oo qaado tallaabooyin lagu caawinayo in gargaarkaasi uu gaaro iyaga. Ha abuurin caqabado ama dib- u- dhacyo.



22. Ixtiraam dhammaan walxaha dhaqanka la xiriira goobaha waxbarashada iyo goobaha cibaadada iyo deegaanka dabiiciga ah.



23. Ku dhaqan xeerarkan xataa haddii cadawgu uusan ku dhaqmeynin. Ha ku kicin falal aargoosi ah.

24. Samee wax kasta oo suurtagal ah si looga hortagto jabinta xeerarka sare ku xusan. Taliyahaaga u sheeg wixii xadgudub ah ee suurto galka ah.



SHARCIGA CAALAMIGA AH EE BINI'AADAMNIMADA

Waqtiyada dagaalka, waa in la raaco xeerar gaar ah. Xeerarkan oo loo yaqaan sharciga caalamiga ah ee bani'aadamnimada ama *IHL*, ayaa ugu horrayn lagu dejiyay afartii Axdi ee Jenefa ee 1949-kii iyo saddexdoodi Sharci Kaabe ee 1977-kii iyo 2005-tii.

Axdiyadan waxay ku dhisan yihiin fikradda ah in dhibaataada bani'aadamka saameyneysa laga hortago ama ugu yaraan la xaddido waqtiyada colaadaha hubaysan, xitaa marka ay timaado cadawga. Waxay dhowrayaan kuwa aan ku jirin dagaalka, waxayna xaddidaan hubka iyo xeeladaha loo adeegsan karo. Xeerarka ku jira axdiyadan ayaa inta badan ka tarjumaya qiyamka guud ee ka dhexeeya dhaqamada, bulshada iyo diimaha.

Qof kasta - shaqaalaha militariga iyo shaqaalaha rayidka si isku mid ah - waa in ay ugu hoggaansamaan xeerarkan. Haddii loo hoggaansami waayo waxaa ka dhalan kara cawaaqib xumo, waxayna noqon kartaa dembi dagaal.

GUDDIGA CAALAMIGA EE LAANQAYRTA CAS

Guddiga Caalamiga ah ee Laanqayrta Cas (ICRC) waa urur aan eexan, dhexdhexaad ah oo madax bannaan iyadoo la aasaasay sanadkii 1863-dii ayaa hawshiisa bani'aadamnimo kaliya ah ay tahay in uu dhowro nolosha iyo sharafta dhibbaneyaasha colaadda hubaysan, xaaladaha kale ee qalalaase iyo, sidoo kale in uu siiyo gargaar. ICRC waxay kaloo ku dadaashaa in ay ka hortagto dhibaatada iyadoo horumarineysa xoojeneysana xeerka bani'aadamnimada iyo mabaadi'da caalamiga ah ee bani'aadamnimada. Iyada oo la aasaasay sanadkii 1863-kii, ICRC-du waa asalka Axdiyada Jenefa iyo Dhaqdhaqaaqa Caalamiga ah ee Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas. Waxay jiheysaa oo isku dubaridaa hawlaha caalamiga ah oo uu Dhaqdhaqaaqu qabto xilliyada colaadaha hubaysan iyo xaaladaha kale ee qalalaase.

BOOQASHOYINKA MAXAABIISTA

Ujeedada hawlaha ICRC-da ee xabsiyada waa in la hubiyo in maxaabiista loola dhaqmo si bini'aadamnimo leh iyo in la ixtiraamo sharaftooda.

Iyada oo qayb ka ah wadahal qarsoodi ah oo lala yeesho mas'uuliyiinta, ICRC-du waxay soo jeedisaa talooyin ku saabsan la macaamilka maxaabiista iyo xaaladaha xabsiga.

Intaa waxa dheer, ICRC-du waxay maamulka xabsiyada siisaa taageero qalab ama farsamo iyada oo meeshii looga baahdo waxay maxaabiista si toos ah u gaarsisaa adeegyo.

ICRC-du waxay la shaqeysaa maamullada heer walba ay yihiin, laga soo bilaabo ilaalada xabsiga ilaa madaxda qaranka.

NIDAAMKA BOOQASHOYINKA

Haddii ay la tacaaleyso xaalad ku xusan Axdiyada Jenefa ama ama aan ku xusneyn, ICRC-du waxay ku dabaqdaa shuruud la mid ah hawlaheeda maxaabiista. Ergada ICRC waa in ay:

- la kulmi karaan dhammaan maxaabiista, waana in ay la hadli karaan iyaga oo xor ah, isla markaana aan cid kale la joogin
- geli karaan dhammaan xabsiyada oo loo ogolaado in ay marar kale booqan karaan
- helaan liisaska dhammaan dadka la booqanayo (ama iyaguba isla meeshaas ku diyaarsan karaan).



WAKAALADDA DHEXE EE BAAFINTA ICRC-DA

Iyada oo la kaashaneysa jimciyad-qarameedyada Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas- Wakaaladda Dhexe ee Baafinta ICRC waxay ka hawlgashaa adduunka oo dhan si ay u caawiso dadka ay kuwii jeclaayeen kala lumeen. Colaadaha hubaysan iyo xaaladaha kale ee qalalaase, hawlaheeduna waa:

- in marka habka caadiga ah ee isgaarsiinta la carqaladeeyo xubnaha qoyska la wada xiriiriyo iyadoo loo maraayo wicitaano telefoon, mareegta Xiriirka Qoyska, ku baahinta raadiyaha iyo farriimaha gacanta la isugu qoro
- in ay baafiso dadka la la'yahay si loogu caawiyo oo qoysaskooda u ogaadaan halka ay ku sugan yihiin
- in ay diwaangeliso oo la socoto shakhsiyaadka nugul sida carruurta iyo maxaabiista si looga hortago in la waayo oo ehelkoodana u ogaadaan meesha ay ku sugan yihiin
- in ay dib- u-mideyso xubnaha qoyska ee lumay ayna abaabusho wareejinta iyo dib-ugu- dhoofinta dalalkooda
- in ay gacan ka geysato caddeynta waxa ku dhacay dadka la la'yahay iyo halka ay ku danbeeyaan, iyo in la hubiyo baahiyaha qoysaskooda in la daboolay.

MA DANEYNEYSAA IN AAD AKHBAAR HESHO?



Si aad wax badan uga ogaato adeegyada Dib-u-Soo Celinta Xiriirka Qoyska ee Wakaaladda Dhexe ee Baafinta ICRC iyo Jimciyadaha Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas ee dalkaaga ka jira, fadlan booqo: familylinks.icrc.org

